



# Hagaha Degdegga ah ee Hannaanada Xallinta Khilaafaadka ee Wax-ka-qabashada Hore ee Waalidiinta haysta Dhallaanka & Socod-baradka (Dhalashada ilaa Da'da 3 jir)

Hagahan looguma talagelin inuu turjumo, wax ka beddelo, ama dooriyo IEA Qaybta C ee ilaalinta habraacyada ama shuruudaha sharciga federaalka ama gobolka. Waalidiinta waxaa lagu dhiiragelinayaa inay la xiriiraan Nebraska Department of Education (Waxda Waxbarashada Nebraska) ama PTI-Nebraska si ay u helaan macluumaad dheeraad ah.

Hannaanada	Kulanka IFSP	Dhexdhexaadinta	Cabashada Gobolka ee Qoran	Cabashada Hannaanka Xuquuq Dhowrka/ Codsiga Dacwad-dhageysiga	Kulanka Xallinta
<b>Ikhtiyaarada Xallinta Khilaafaadka</b>	Hannaanka xallinta hore ee ikhtiyaariga ah waxaa qabta Isku-duwaha Adeegyada kaas oo ka caawiya kooxda individualized family service plan (qorshaha adeegga qoyska ee la gaar yeelay, IFSP) wadaxiriirka iyo xallinta dhibaataada.	Hannaanka mutadawacnimo ee dadka iskugu keena iyadoo la adeegsanayo dhexdhexaadiye aan eex lahayn, aqoon leh, oo tababaran, kaas oo ka caawiya inay wadahadlaan midba midka kale, muujiyaan walacyada, oo xalliyaan isfahan darada.	Dukumeenti qoran oo loo isticmaalo in lagula xiriiro in adeeg bixiyaha ama isku-duwaha adeegyada wax-ka-qabashada hore, wakaaladda hoggaanka gobolka, ama wakaalad kale oo dadwayne (sida degmo-dugsiiyeedka ama wakaaladda isku-duwida adeegyada) aanu raacin IDEA, iyo inuu xallin ka codsado gobolka.	Hannaan sharci ah ayaa loo adeegsadaa in lagu xalliyo cabashada uu gudbiyay waalidka, bixiyaha adeegga wax-ka-qabashada hore, ama wakaaladda hoggaanka qaybta C ee gobolka.	Kulan dhacaya ka dib marka waalidku xereysto cabashada hannaanka xuquuq dhowrka, laakiin ka hor inta aan la gaarin dhiciitaanka dacwad-dhageysiga hannaanka xuquuq dhowrka. Ujeedada kulanku waa in waalidku uu kala hadlo cabashada hannaanka xuquuq dhowrka ee wakaaladda hoggaanka si ay iskugu dayaan in ay xalliyaan arrimaha.
<b>Waa Maxay Arrimaha &amp; Goorta La Isticmaalo</b>	Waxaa la adeegsadaa marka kooxda IFSP ay ku heshiin waayaan arrimaha muhiimka ah ee la xiriira IFSP-ga ilmaha, ama marka kulanka la filayo in lagaga hadlo arrimo adag ama aragtiyo kala duwan.	La heli karo mar kasta oo uu jiro khilaaf u dhexeeya waalidiinta iyo bixiyeyaasha/ barayaasha wax-ka-qabashada hore ee ku saabsan adeegyada ama habraacyada wax-ka-qabashada hore. Waxaa la codsan karaa wakhti kasta, oo ay ku jiraan ka hor inta, ama marka codsiga dacwad-dhageysiga hannaanka xuquuq dhowrka leh ama cabashada gobolka ee qoran la xareeyo.	La heli karo marka ay jirto su'aal ku saabsan in sharciyada IDEA la raacay iyo in kale marka loo eego dhallaan/ socod-barad gaar ah iyo qoyska ama dhallaanka/socod-baradka iyo nidaamka qoyska oo dhan.	Loo isticmaalo in lagu xalliyo khilaafaadyada la xiriira aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta dhallaanka ama socod-baradka, ama bixinta adeegyada wax-ka-qabashada hore ee dhallaanka ama socod-baradka naafada ah iyo qoyska ilmahaas.	Loo isticmaalo in lagu xalliyo arrimaha ku qoran codsiga cabashada/dacwad-dhageysiga hannaanka cadaaladeed ee waalidka. Shirku waa inuu dhacaa ilaa waalidka iyo wakaaladda hoggaanka ay qoraal ahaan ku heshiiyaan in aan kulanka la qaban, ama in la isticmaalo hannaanka dhexdhexaadinta baddelkeeda.
<b>Yay tahay Cida Bilaabaysa</b>	Xubin ka tirsan qoyska, Early Intervention Service (Bixiyaha Adeegga Wax-ka-qabashada Hore, EIS), wakaaladda hoggaanka iyo/ama wakaaladda dadwaynaha ayaa codsan karaan kulanka IFSP.	Xubin ka tirsan qoys, bixiyaha EIS ama isku-duwaha adeegyada, wakaaladda hoggaanka iyo/ama wakaaladda dadwaynaha ayaa codsan karaan dhexdhexaadin, laakiin ka qayb qaadashadu waa inay noqotaa mid ikhtiyaari u ah dhammaan dhinacyada.	Qof kasta ama hay'ad kasta, xitaa kuwa ka socda gobol kale, wuxuu xareyn karaa cabasho gobol oo qoran.	Waalidka, bixiyaha adeega wax-ka-qabashada hore, ama wakaaladda hoggaanka u ah Qaybta C ee gobolka ayaa laga yaabaa inay xareeyaan codsiga cabashada/dacwad-dhageysiga hannaanka cadaalada ah.	Wakaaladda hoggaanka waa inay ku qabataa kulanka xallinta 15 maalmood oo shantirsi gudahooda marka la helo ogaysiiska codsiga cabashada/dacwad-dhageysiga hannaanka caddaalada ah ee waalidka.
<b>Natijada La Rabo ama La Filayo</b>	IFSP ay taageeraan qoyska iyo xubnaha kale ee Kooxda IFSP oo faa'iido u leh ilmaha iyo qoyska. IFSP waxaa laga yaabaa inay wax-ka-qabato arrimaha kale ee la xiriira bixinta adeegyada dhallaanka/ socod-baradka iyo qoyska.	Heshiis qoran oo la saxiixay, sharci ahaan dhaqangeli karo.	Go'aan qoran oo ay ku jiraan natijooiyinka iyo gunnaanadyada, oo taxaya sababaha keena go'aanka kamadambaysta ah. Haddii ay jirto in la ogaado in IDEA aan la raacin, warbixintu waa inay sidoo kale ku jirtaa tallaabooyinka sixitaanka ee loo baahan yahay si wax looga qabto baahiyaha dhallaanka/socod-baradka iyo qoyska ee la xiriira cabashada.	Natijooiyinka qoran ee xaqiigda iyo go'aamada. Go'aanku wuxuu dalban karaa tallaabooyin gaar ah in la qaado.	Heshiis la saxiixay, sharci ahaan la dhaqangelin karo oo xalliya qaar ka mid ah ama dhammaan arrimaha ku taxan codsiga cabashada/dacwad-dhageysiga hannaanka caddaalada ah, oo inta badan loo yaqaano heshiiska xalka dhexdhexaadinta.

Hannaanada	Kulanka IFSP	Dhexdhexaadinta	Cabashada Gobolka ee Qoran	Cabashada Hannaanka Xuquuq Dhowrka/ Codsiga Dacwad-dhageysiga	Kulanka Xallinta
<p><b>Kala-soocida Hannaanka</b></p>	<p>Kulamada IFSP waa ikhtiyaarka hore ee xallinta khilaafaadka kaas oo u oggolaanaya dhammaan xubnaha kooxda fursad ay si buuxda uga qayb qaataan.</p>	<p>Wadahadallada dhexdhexaadintu waa qarsoodi oo lama aqbali karo dacwad-dhageysiga hannaanka xuquuq dhowrka ama dacwadda madaniga ah.</p> <p>Dhexdhexaadintu waa hannaan dabacsan – kaqaybgalayaashu waxay saamayn ku yeelan karaan hannaanka waxayna ugu dambeyntii go'aamiyaan natiijada.</p> <p>Dhexdhexaadiyaha go'aan ma gaaro. Dhammaan ka qaybgalayaashu waa inay ku heshiiyaan go'aan kasta oo ku jira heshiiska dhexdhexaadin ah.</p>	<p>Tani waa ikhtiyaarka kaliya ee xallinta khilaafaadka ee u furan qof kasta ama urur kasta, oo ay ku jiraan kuwa aan xiriirka la lahayn ilmaha.</p> <p>Go'aanka kamadambaaysta ah waxaa ku jiri kara tallaabooyinka sixitaanka ee gaarka u ah carruurta ama la xiriira arrimaha nidaamka oo dhan.</p> <p>Dacwoodaha wuxuu heli doonaa fursad uu ku bixiyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan walaacyada. Macluumaadkan waxaa loo bixin karaa hadal ahaan ama qoraal ahaan.</p>	<p>Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay helaan qoraalka asalka ah ee dacwad-dhageysiga ee qoran ama elektaroonig ah, iyadoo aan wax kharash ah laga qaadin waalidiinta.</p> <p>Hannaanka racfaannada ee ku aadan go'aanka sarkaalka dacwad-dhageysiga wuu ku kala duwan yahay gobol ilaa gobol waxaana laga yaabaa inay ku jirto wakaaladda hoggaanka oo samaynaysa dib-u-eegista eex la'aan ah. Dhinaca aan ku raacsanayn go'aanka dib-u-eegista (marka la heli karo) ama go'aanka sarkaalka dacwad-dhageysiga, ayaa racfaan ka qaadan karo isagoo racfaan u gudbinayo maxkamadda gobolka ama federaalka.</p>	<p>Kulamada xallinta waxay dhacaan kaliya ka dib marka codsiga cabashada/ dacwad-dhageysiga dacwadda uu waalidku xareeyo.</p> <p>Kulanka xallinta wuu dhacaa ilaa waalidka iyo wakaaladda hoggaanka ay qoraal ahaan ku heshiiyaan in aan kulanka la qaban mooyee oo ay si toos ah u tagaan dacwad-dhageysiga hannaanka caddaalada ah, ama in la isticmaalo hannaanka dhexdhexaadinta beddelkeeda.</p>
<p><b>Faa'idooyinka</b></p>	<p>Waxaa laga yaabaa inay dhisto oo wanaajiso cilaacaadka ka dhexeeyo xubnaha kooxda IFSP.</p> <p>Waxay kaa caawin kartaa xallinta khilaafaadka si ka dhakhso badan ikhtiyaarada kale.</p> <p>Waxay ku ekaysaa go'aan gaarista xubnaha kooxda IFSP ee sida ugu fiican u yaqaana ilmaha.</p> <p>Waxaa laga yaabaa in kooxda IFSP ay u wada shaqeeyaan si wax-ku-ool ah oo hufan.</p>	<p>Wadahadalladu waa qarsoodi – waxyaabaha lagu dhex sheego dhexdhexaadinta caddayn ahaan looguma isticmaali karo dacwad-dhageysiga hannaanka xuquuqda caddaalada ah ama dacwadda madaniga ah.</p> <p>Dhexdhexaadintu waxa ay bixisa beddel dabacsanaan badan, oo leh iska hor imaad yar oo ku aadan cabashooyinka qoran ee gobolka ama dacwad-dhageysiga hannaanka caddaalada ah.</p> <p>Mararka qaarkood ka qayb galayaashu waxay la shaqeeyaan dhexdhexaadiyaha si ay u qaabeeyaan hannaanka. Marmar, ka qayb galayaasha waxaa laga yaabaa in loo oggolaado inay si wadajir ah u doortaan dhexdhexaadiyaha.</p> <p>Dhexdhexaadintu waxay kaa caawin kartaa xallinta khilaafaadka si ka dhakhso badan cabashooyinka qoran ee gobolka ama dacwad-dhageysiyada hannaanka cadaaladda ah.</p>	<p>Go'aan qoraal ah waa in la soo saaraa waqti aan ka dambayn 60 maalmood oo shantirsi ka dib marka cabashada la helo, haddii aan waqtiga go'an loo kordhin xaaladaha gaarka ah awgood mooyee.</p> <p>Cabashada gobolka ee qoran ayaa fudud in la xareeyo.</p>	<p>Waxay bixisaa fursad ah in cid saddexaad oo dhexdhexaad ah ay go'aan ka gaarto arrimaha aysan dhinacyadu wada xallin karin.</p> <p>Laga bilaabo taariikhda cabashada hannaanka xuquuq dhowrka la xareeyay ilaa laga gaaro go'aanka kamadambaaysta ah, ilaa hay'adda hoggaanka iyo waalidku si kale ku heshiiyaan mooyaane, ilmaha waa inuu sii wataa inuu helo adeegyada wax-ka-qabashada hore ee ku habboon goobta lagu aqoonsaday IFSP ee ay oggolaadeen waalidiinta.</p> <p>Haddii cabashada hannaanka cadaaladeed ay ku lug leedahay codsiga adeegyada bilowga ah ee hoos yimaada Qaybta C, ilmuhu waa inuu helaa adeegyada aan lagu muransanayn.</p> <p>Ilaa racfaan laga qaato mooyaane, go'aanka sarkaalka dacwad-dhageysiga wuxuu si sharci ah ugu xiran yahay wakaaladda hoggaanka iyo waalidiinta.</p>	<p>Waxay siisaa fursad si waalidka iyo wakaaladda hoggaanka ay uga wadashaqeeyaan xallinta arrimaha ka hor dacwad-dhageysiga hannaanka caddaaladda ah.</p> <p>Waxay ku ekaysaa go'aan gaarista waalidka iyo hay'adda hoggaanka ee yaqaana ilmaha.</p> <p>Hay'adda hoggaanka waxay keeni kartaa qareen kulanka xallinta kaliya haddii waalidku doorto inuu keeno qareen.</p> <p>Waxay keeni kartaa heshiis sharci ku xirid ah, oo la fulin karo.</p> <p>Waalidiinta ama hay'adda hoggaanka waxay baabi'in karaan heshiiska ku xallinta saddex maalmood oo shaqo gudahooda laga bilaabo marka heshiiska la saxiixo.</p>

Hannaanada	Kulanka IFSP	Dhexdhexaadinta	Cabashada Gobolka ee Qoran	Cabashada Hannaanka Xuquuq Dhowrka/ Codsiga Dacwad-dhageysiga	Kulanka Xallinta
Tixgelinnada	Si hannaanku u noqdo mid guulaysta, qof kasta oo kulanka jooga wuxuu u baahan yahay inuu noqdo mid ixtiraam badan, dhageysto dadka kale oo uu diyaar u yahay inuu si buuxda uga qaybqaato.	Dhexdhexaadintu waa ikhtiyaari, markaa xubinta qoyska, bixiyaha EIS, wakaaladda hoggaanka iyo/ama wakaaladda dadwaynaha waa inay oggolaadaan inay ka qayb qaataan. In arrimaha la xalliyo, ama heshiis la gaaro, waxay ku xiran tahay ka qayb galayaasha. Xaaladaha cakiran ayaa laga yaabaa inay u baahdaan fadhiyo dhexdhexaadin oo badan si loo heshiiyo. Ma jirto dammaanadqaad ah in heshiiska qoraal ah la abuurdo.	Qofka ama ururka gudbinaya cabashada waa inuu keenaa xaqiiqooyin si uu u taageero walaaca ah in IDEA aan la raacin. Cabashada gobolka ee qoran waa in la saxiixaa. <b>FIIRO GAAR AH:</b> Oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay si qolo saddexaad loogu sii daayo macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo. Hannaankani uma baahna kuwa ku lugta leh in ay isku dayaan inay si wadajir ah u xalliyaan khilaafka. Si kastaba ha ahaatee, dhexdhexaadinta ayaa weli la heli karaa wakhti kasta. IDEA ugama baahna gobolada inay bixiyaan habraaca racfaanka ee go'aanka qoran. Haddii racfaanka la oggolaado, shantirsiga 60-ka maalin ah ee wakhtiga go'an ee go'aanka kamadambaysta ah ayaa weli dhaqangal ahaan doona. <i>Ka hubi wakaaladdaada hoggaanka gobolka wixii ikhtiyaarada la heli karo ah.</i>	<b>Go'aanka waxaa gaara sarkaal dacwad-dhageysi kaas oo:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>Aan ahayn shaqaale ka tirsan wakaaladda hoggaanka ama bixiyaha adeegga wax-ka-qabashada hore oo ku lugta leh bixinta adeegyada wax-ka-qabashada hore ama daryeelka ilmaha;</li> <li>Aan lahayn dano shakhsiyeed ama mid xirfadeed taas oo ka hor imaanaysa hufnaantiisa/ hufnaanteeda ku aadan fulinta hannaanka.</li> </ul> Wakaaladda hoggaanka waxaa laga yaabaa inuu qareen matalo. Haddii waalidku uu qabsado qareen, kharashka waxaa iska bixinaya waalidka.	Inkastoo IDEA aysan u baahnayn, dhinacyadu waxay dooran karaan inay saxiixaan heshiis qarsoodi ah ama waxay ku dari karaan heshiiska xallinta.
Go'aan-gaaraha	Kooxda IFSP, oo ay ku jiraan waalidka dhallaanka/ socod-baradka.	Ka qayb galayaasha, oo ay ku jiraan waalidka dhallaanka/socod-baradka, waxay si wadajir ah uga shaqeeyaan xallalka waxayna gacanta ku hayaan natijada.	Dawladdu waxay mas'uul ka tahay hubinta in cabashada la xalliyo, iyo in go'aan madax-bannaan laga gaaro cabashada.	Sarkaalka dacwad-dhageysiga ayaa gaara go'aanka dacwad-dhageysiga. Haddii go'aanka looga racfaan qaato wakaaladda hoggaanka, sarkaal dib-u-eegis oo aan eex lahayn ayaa go'aanka gaara. Haddii go'aanka dacwad-dhageysiga ama dib-u-eegista laga qaato racfaan loo maray maxkamadda, garsooraha gobolka ama federaalka ayaa go'aanka gaaraya.	Waalidiinta iyo wakaaladda hoggaanka waxay tilmaamayaan shuruudaha heshiis kasta oo xalin ah.

Hannaanada	Kulanka IFSP	Dhexdhexaadinta	Cabashada Gobolka ee Qoran	Cabashada Hannaanka Xuquuq Dhowrka/ Codsiga Dacwad-dhageysiga	Kulanka Xallinta
<p><b>Doorka Qolada Saddexaad</b></p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Ima khuseyso</li> </ul>	<p><b>Dhexdhexaadiyaha sida caadiga ah:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Wuxuu ka caawiyaa ka qayb galayaasha inay horumariyaan sharciyada asaasaiga ah ee fadhiga/ kulanka.</li> <li>• Wuxuu abuuraa jawi ammaan ah wuxuuna ku dhiirageliyaa ka qayb galayaasha inay ixtiraamaan fikradaha kale.</li> <li>• Wuxuu haggaa doodda isagoo dhageysanaya, aqoonsanaya danaha, oo caddaynaya walaacyada.</li> <li>• Ma gaaro go'aamo.</li> <li>• Wuxuu aqoon u leeyahay sharciyada la xiriira waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.</li> </ul>	<p><b>Baaraha cabashada:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Ayaa dib-u-eegis ku sameeya macluumaadka la xiriira cabashada.</li> <li>• Ayaa waraysan kara ama la kulmi kara dadka ay khusayso cabashada.</li> <li>• Wuxuu gaaraa natijooyin iyo go'aan ku salaysan sharciyada la dabaqi karo.</li> </ul>	<p><b>Sarkaalka dacwad-dhageysiga:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Wuxuu la socdaa waqtiga go'an dacwad-dhageysiga, oo ay ku jiraan dhammaan hawlaha dacwad-dhageysiga ka hor.</li> <li>• Wuxuu qabtaa dacwad-dhageysiga wuxuuna maamulaa arrimaha habraacyada.</li> <li>• Wuxuu adeegsadaa sharciyada la dabaqi karo si uu u qoro go'aanka ku saleysan marag-furka iyo cadeymaha kale ee lagu soo bandhigay dacwad-dhageysiga.</li> <li>• Waxaa laga yaabaa inuu dafiro cabashada hannaanka caddaalada ah (codsiga dacwad-dhageysiga) haddii arrimaha la xalliyo ka hor dacwad-dhageysiga.</li> </ul>	<p>IDEA uma baahna fududeeye qolo saddexaad ka socda inuu joogo kulamada xallinta</p>
<p><b>Waqtiga Go'an</b></p>	<p>Ma jiro waqti cayiman laakiin dib uma dhigi karo waqtiyada loo baahan yahay soo saarista koowaad ama dib-u-eegista IFSP.</p> <p>Shirarka IFSP waa in lagu qabtaa goob laguna aadiyaa wakhti uk habboon qoyska. Isku-duwaha Adeegyada wuxuu siiya ogeysiis qoraal ah dhammaan xubnaha kooxda waqti kahor si loogu oggolaado inay ka soo qaybgalaan iyo sidoo kale si loogu oggolaado xubnaha kooxda ee aan iman karin inay helaan fursad ay fikrad ugu bixiyaan hab kale ah.</p>	<p><b>Ma jiro waqti go'an oo la cayimay. Loo baahan yahay in lagu jadwaleeyo waqti cayiman gudahiisa.</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Dhexdhexaadinta waxaa laga yaabaa inaan loo isticmaalin in lagu diido ama dib loo dhigo xaqa qoyska ay u leeyihiin dacwad-dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh, ama in lagu diido xuquuq kasta oo kale sida hoos timaada Qeybta C ee IDEA.</li> </ul>	<p><b>Sida ku cad IDEA, cabashooyinka gobolka ee qoran waa in lagu xareeyaa hal sano gudahiisa laga bilaabo taariikhda uu shakhsigu ogaaday ama ay ahayd inuu ogaado dhibaataada.</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Go'aanka qoran waa in lagu soo saaraa waqti aan kadambayn 60 maalmood oo shantirsi ah laga bilaabo taariikhda cabashada la gudbiyay, ilaa wakhtiga lagu kordhiyo duruufo gaar ah dartood ama in dhinacyadu ay ku heshiiyaan in la kordhiyo wakhtiga hawsha dhexdhexaadinta mooyee.</li> </ul>	<p><b>Sida ku cad IDEA, qoladu waa inay codsataa dacwad-dhageysi (ku xarayso cabashada hannaanka cadaaladda ah) mid ka mid ah midkood:</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Laba sano gudahooda laga bilaabo taariikhda ay qolada ogaadeen ama ay ahayd inay ogaadaan tallaabada aasaaska u ah dacwad-dhageysiga.</li> </ol> <p>Go'aanka dacwad-dhageysiga qoran waa in lagu soo saaraa 45 maalmood oo shantirsi ah gudahooda laga bilaabo dhammaadka xilliga xallinta, haddii uusan sarkaalka dacwad-dhageysiga bixin waqti kordhin gaar ah oo ku aadan codsiga qolada mooyee.</p>	<p><b>Wakaaladda hoggaanka waa inay qabataa kulanka xallinta 15 maalmood oo shantirsi gudahooda marka la helo ogaysiiska cabashada hannaanka cadaaladda ah ee waalidka, ilaa waalidka iyo wakaaladda hoggaanka:</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Ay qoraal ahaan ugu heshiiyaan inay ka tanaasulaan kulanka xallinta mooyee; ama</li> <li>2. Ay ku heshiiyaan inay dhexdhexaadin adeegsadaan mooyee. Waalidku waxa uu ka codsan karaa sarkaalka dacwad-dhageysiga hannaanka caddaaladda ah inuu bilaabo wakhtiga go'an ee dacwad-dhageysiga haddii ay wakaaladu ku qaban waydo kulanka xallinta wakhtigii loogu talagalay.</li> </ol> <p>Waalidka iyo wakaaladda hoggaanka waxay haystaan ilaa 30 maalmood oo shantirsi ah si ay u gaaraan xal (oo loo yaqaano muddada xallinta). Haddii ay xal gaari waayaan inta lagu gudajiro muddadas, waxaa dhici karta in dacwad-dhageysiga hannaanka caddaaladda ah uu dhaco. Sarkaalka dacwad-dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh ayaa laga yaabaa inuu kordhiyo muddada xallinta haddii labada dhinacba ay qoraal ahaan ku heshiiyaan.</p>

Hannaanada	Kulanka IFSP	Dhexdhexaadinta	Cabashada Gobolka ee Qoran	Cabashada Hannaanka Xuquuq Dhowrka/ Codsiga Dacwad-dhageysiga	Kulanka Xallinta
<b>Kharashka Maaliyadeed/Yaa Bixiya Lacagaha</b>	Wax kharash ah laguma dallaco qoyska.	Wax kharash ah laguma dallaco qoyska. Dhexdhexaadiyaha iyo xarumaha waxaa lagu bixiyaa kharashka dawladda.	Wax kharash ah laguma dallaco qoyska. Baaritaanka waxaa la sameeyaa go'aankana la garaa iyadoo la adeegsanayo kharashka dawladda.	Dacwad-dhageysiga, sarkaalka dacwad-dhageysiga, xarumaha, iyo go'aanka waa in aysan wax kharash ah kaga bixin waalidiinta. Qola kasta waxay bixisaa kharashkeeda gaarka ah, oo ay ku jiri karaan khidmadaha qareenka iyo khidmadaha markhaatiga.	Kulanka xallinta waxaa la qabtaa iyadoo wax kharash ah uusan kaga bixin waalidka. Si kastaba ha noqotee, haddii waalidiinta u soo wataan qareen kulanka xallinta, waalidka ayaa mas'uul ka ah bixinta khidmadaha qareenkooda.
<b>Saamaynta uu ku leeyahay Xiriirada</b>	Waxay u oggolaataa xubnaha kooxda inay si wax-ku-ool ah u xalliyaan dhibaataada. Wadaxiriir wanaagsan iyo xiriirada hagaagsan ayaa inta badan ka dhasha kulamada IFSP.	Dhexdhexaadiye ayaa laga yaabaa inuu ka caawiyo kaqaybgalayaasha inay si wax-ku-ool ah u xalliyaan dhibaataada. Wadaxiriir wanaagsan iyo xiriirada hagaagsan ayaa inta badan ka dhasha dhexdhexaadinta.	Hannaankani diiradda ma saarayo xiriirada.	Hannaanka caddaalada ayaa loo tixgaliyaa inuu yahay hannaanka xallinta khilaafaadka ee aadka iskaga soo horjeedo.	Kulamada xallinta waxay siinayaan waalidiinta iyo wakaaladda hoggaanka fursad ay ku cadeeyaan oo ay ku xalliyaan arrimaha ka hor inta aan la qaadin hannaanka dacwad-dhageysiga caddaalada ah.
<b>Sida Loo Diyaariyo</b> <i>Khayraad dheeraad ah ayaa laga heli karaa mareegta CADRE</i> <a href="http://cadreworks.org">cadreworks.org</a>	<b>Waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inaad:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>Sameysato liiska arrimaha aad rabto inaad nagala hadasho iyo su'aalaha aad rabto inaad na waydiiso.</li> <li>Ka fikirto waxa ugu muhiimsan ee khuseeya baahiyaha ilmahaaga iyo qoyskaaga.</li> <li>Diyaar u noqoto inaad dhegaysato oo aad si taxadar leh u tixgeliso fikradaha dadka kale, iyo sidoo kale xallalka suurtagalka ah.</li> <li>Isku aadisato dukumeentiyada, ku qorto taariikho iyo qoraalo, oo aad keento nuqullo dheeraad ah oo nala wadaago.</li> <li>Keento agabyo laga yaabo inay waxtar u yeeshaan in loo sharraxo ama lagu wargeliyo dadka kale.</li> <li>Ka fikirto sida aad u qorsheyneyso inaad ula tacaasho shucuurada inta lagu gudajiro kulanka.</li> </ul>	<b>Waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inaad:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>Sameysato liiska arrimaha aad rabto inaad nagala hadasho iyo su'aalaha aad rabto inaad na waydiiso.</li> <li>Ka fikirto waxa ugu muhiimsan ee khuseeya baahiyaha ilmahaaga iyo qoyskaaga.</li> <li>Diyaar u noqoto inaad dhegaysato oo aad si taxadar leh u tixgeliso fikradaha dadka kale, iyo sidoo kale xallalka suurtagalka ah.</li> <li>Isku aadisato dukumeentiyada, ku qorto taariikho iyo qoraalo, oo aad keento nuqullo dheeraad ah oo nala wadaago.</li> <li>Keento agabyo laga yaabo inay waxtar u yeeshaan in loo sharraxo ama lagu wargeliyo dadka kale.</li> <li>Ka fikirto sida aad u qorsheyneyso inaad ula tacaasho shucuurada inta lagu gudajiro kulanka.</li> <li>Timaado wax yar ka hor xilliga kulanka, si aad u hesho wakhti aad ugu diyaargarowdo ka qayb qaadashada.</li> </ul>	<b>Qofka cabashada soo gudbinaya waa inuu:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>Soo raaciyaa dhammaan macluumaadka loo baahan yahay si loo taageero sheegashada IDEA ee ah inaan la soo raacin markii cabashada la xareeynaayay.</li> <li>Isla markaana cabashada waa in loo gudbiyo Gobolka, dacwoodaha waa inuu nuqulka cabashada siiyaa bixiyaha EIS, wakaaladda hoggaanka gobolka ama cidda ay cabashadu ka soo horjeedo.</li> <li>Ka jawaabaa dhammaan codsiyada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cabashada waqtiga ku habboon.</li> </ul> <p>Waxaa laga yaabaa inay ku caawiso in la abaabulo dhammaan diiwaanada ilmaha iyo dukumeentiyada kale oo loo diyaargarooobo si loo muujiyo sida macluumaadkani u muujinayo in wakaaladu aanay raacin shuruudaha.</p>	Diyaargarow la taaban karo ayaa loo baahan yahay si kiiska loogu soo bandhigo si buuxda. <b>Dhinacyadu waa in ay u diyaargaroooban inay sameeyaan waxyaabahan soo socda inta lagu gudajiro dacwad-dhageysiga:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>Uruurinta iyo soo gudbinta caddaymaha</li> <li>Diyaarinta markhaati-furka, liisaska markhaatiga, iyo dukumeentiyada kale ee dacwad-dhageysiga</li> <li>Su'aal weydiinta iyo dib u su'aalida markhaatiga</li> </ul> <p>Dhinacyadu waxay doortaan inay soo wataan ama la tashadaan qareen iyo in kale. Qofka uusan qareen matalin waxaa loogu yeeri karaa inuu u soo muuqday <i>"isaga naftiisa."</i> Kani waa erey Laatiini ah oo macnehiisu yahay in qofku isaga naftiisa ama nafteeda isku matalo dacwadda sharciga ah.</p>	<b>Waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inaad:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>Keento nuqulka cabashada hannaanka xuquuq dhowrka/codsiga dacwad-dhageysiga, iyo sidoo kale agabyo kale oo laga yaabo inay ku anfacaan.</li> <li>Sameyso liiska baahiyaha ilmahaaga iyo qoyskaaga.</li> <li>Isku aadisato agabyada, oo ay ku jiraan xasuu-qorada iyo taariikhaha ku yaala dukumeentiyada.</li> <li>Tixgeliso dhammaan xallalka suurtagalka ah ee dhibaataadu leedahay.</li> <li>Ka fikirto sida aad u qorshaynayso inaad wax uga qabato shucuurada inta kulanka lagu gudajiro oo isku duynado inaad yididiilo muujiso oo aad xallalka u furmaato.</li> <li>Fiirto gaar ah u yeelo waqtiyada go'an ee ku qoran warqaddo kasta aad hesho.</li> </ul> <p>Tixgeli inaad weydiiso qof inuu kuu soo raaco kulanka xallinta, si uu kaaga caawiyo habaynta macluumaadka oo muuji niyad-wanaag.</p>



## Shabakadda Korriinka Hore ee Nebraska

Nebraska ayaa wax ka beddeshay dukumeentigan ay samaysay CADRE. Dukumeentigan hagitaanku waa talo-bixin dabiici ah laakiin way ku khasban tahay wakaaladda ilaa inta ay wax-ka-beddel kaga samaynayso wakaaladdan oo kale. Dukumeentiga hagitaanka kuma jiraan dukumentiyada habraaceed ee gudaha ee saamayn ku yeesha oo kaliya hawlaha gudaha ee wakaaladda oo aan ku soo rogin shuruudo ama ganaaxyo dheeraad ah dhinacyada la sharciyeeyay ama ay ku jiraan macluumaad qarsoodi ah ama qawaaniin iyo sharciyo lagu sameeyay si waafaqsan Administrative Procedure Act (Xeerka Habraaca Maamulka). Haddii aad rumaysan tahay in dukumeentigan hagitaanku uu ku soo rogayo shuruudo ama ganaaxyo dheeraad ah dhinacyada la sharciyeeyey, waxaad codsan kartaa in dib-u-eegis lagu sameeyo dukumeentiga. Wixii faallooyin ah ee ku saabsan dukumeentigan la xiriir [nde.guidance@nebraska.gov](mailto:nde.guidance@nebraska.gov). Waa siyaasadda Waaxda Waxbarashada ee Nebraska in aan takoor la samayn iyadoo lagu salaynaayo jinsiga, naafanimada, isirka, midabka, diinta, xaaladda guurka, da'da, asalka qarameedka ama macluumaadka hidaha ee barnaamijyada waxbarasho, maamulka, siyaasadaha, shaqaalaynta ama barnaamijyada kale ee hay'adda.

402-471-2471 | [edn.ne.gov](http://edn.ne.gov)



## Xarunta loogu talagalay Xallinta Khilaafaadka dd Habboon ee Waxbarashada Gaarka ah

CADRE ayaa soo saartay dukumeentigan iyadoo raacayso Heshiiska Iskaashiga ee U.S. Department of Education Office of Special Education Programs (Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah ee Xafiiska Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka) ee Lambarkiiisu Yahay H326X130001. Tina Diamond, Ph.D., waxay soo noqotay sarkaalka sare ee mashruuca. Aragtiyada halkan lagu sheegay daruuri ma ahan inay matalaan mawqifyada ama siyaasadaha Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka. Ma jiro ayyidaad rasmi ah oo ay Waaxda Waxbarashada Mareykanka ka bixisay alaab, baddeeco, adeeg, ama shirkad kasta oo lagu sheegay daabacaadan in loogu talagalay ama waa in la sababeeyaa. Qoraalkani waa mid guud. Oggolaanshaha dib u soo saarida gabi ahaan ama qayb ahaan ayaa la bixiyay. Inkastoo fasaxa dib-u-daabicida aan loo baahnayn, tixraacu waa inuu noqdaa: CADRE (2018). Hagaha Degdegga ah ee CADRE ee ku aadan Hannaanada Xallinta Khilaafaadka wax-ka-qabashada Hore ee Waalidiinta haysta Dhallaamada & Socod-baradyaasha (Dhalasho ilaa Da'da 2 jir), Eugene, Oregon, CADRE. Taariikhda daabacaada: Sitembar 2018.

541-359-4210 | [cadre@directionservice.org](mailto:cadre@directionservice.org) | [cadreworks.org](http://cadreworks.org)